# Soo koobida fulinta

# Daraasad wadajir ah: jinsiyadda iyo midab-takoorka arrin caafimaadka dadweynaha ahaan

Daraasad ay dhammaystireen tabaruceyaal ka socda Gudiga Xuquuqul Insaanka iyo Guddiga La-talinta Adeegyada Caafimaadka Dadweynaha

October 2022

OLMSTED COUNTY
MINNESOTA



# Soo Koobida Fulinta

## Xaalad

Guddiga La-talinta ee degmada Olmsted waxa ay aqoonsadeen sinaan la'aanta iyo kala duwanaanshiyaha laxiriiraa "jinsiga iyo cunsuriyada in ay tahay arin caafimaad dadweyne." Bishii Ogosto 2020, Golaha Degmada Olmsted waxa uu meel mariyey qaraar (Qaraarka No. 20-153) isagoo waydiinaya laba ka mid ah kooxahooda la-talinta tabaruceyaasha ah. - Guddiga La-talinta Adeegyada Caafimaadka Dadweynaha ee Degmada Olmsted (PHSAB) iyo Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Degmada Olmsted (HRC) - si wadajir ah u daraaseeya oo u baara faraqa jinsiyadeed ee ka dhasha cunsuriyadda nidaamsan.

## Asal

Nidaam, ama qaabdhismeed cunsuriyad ma aha wax aad taaban karto, laakiin waxay ku jirtaa aasaaskeena, waxayna qayb ka ahayd nidaamyadeenna oo bilaabmay boqollaal sano ka hor. Degmada Olmsted waxa ay qiraysaa in saamaynta cunsuriyadda habaysan ay dhab tahay iyo in ay lama huraan tahay in la fahmo, la aqoonsado, oo wax laga qabto caqabadaha hay'adaha iyo nidaamka.

## Qiimeyn

Aag kasta oo diirada la saaray wuxuu muujinayaa:

- xogta dadweynaha khusaysa ee bilowga ah iyo xogta barnaamijka oo diiradda lagu saaray farqiga u dhexeeya jinsiyadda,
- taxayaa talooyinka qabyada ah,
- oo soo bandhiga  xogta tayada iyo tirada ee fadhiyada ka qaybgalka bulshada.

## Talooyin

Ka dib markii la soo gabagabeeyay dhowr bilood oo cilmi-baaris, falanqayn, ka-qaybgal bulsho, iyo dood, koox-hoosaadyadii tabaruceyaasha waxay soo gabagabeeyeen 42 talobixin oo ka kooban 10 goobood oo diiradda lagu saarayo Golaha Deegaanka..

# Daraasad Wadajir ah: jinsiyadda iyo midab-takoorka sida arrin caafimaadka dadweynaha ah Talooyinka Kama Dambeysta ah

## La xisaabtanka:

1. Xaqiiji la xisaabtanka la socodka horumarka cunsuriyadda oo ah arrin caafimaad dadweyne.

## Guddiyada la-talinta:

2. Yaree caqabadaha ka-qaybgalka guddiyada la-talinta Degmada Olmsted si loo kordhiyo matalaadda madow, kuwa asaliga ah, dadka midabka leh (BIPOC) iyo codadka khibradaha nolosha..
3. Ka saar ama beddel qawaaniinta gobolka ee xannibaya ka-qaybgalka guddiyada degmada.

## Cadaaladda dembiyada:

4. La shaqee la-howlgalayaasha bulshada si aad u hubiso in hababka ciribtirka bilaashka ah ay diyaar u yihiin dadka galay dembiyada yaryar.
5. Ka shaqee si aad u hubiso in dadka leh diiwaanka dambiyada ay heli karaan doorashooyin guri.
6. Qiimee sida ugu waxtarka leh ee fulinta sharciga iyo la-jawaabiyayaasha ay hoos u dhigayaan ugana jawaabaan dadka la-dhibaataysan caafimaadka dhimirka.
7. La shaqee la-howlgalayaasha bulshada iyo xubnaha bulshada BIPOC si aad u barato sida loo maareeyo isdhexgalka sharci fulinta. .
8. La shaqee la-howlgalayaasha bulshada si ay dadka ugu taageeraan dib u eegista kiisaska la xaliyay ee suurtogalka ah in dib loo furo oo dib loo eego kiisaska ay khaladaad dhaceen.

## Adeegga macaamiisha:

9. Ka soo ururi talooyinka dadka loo adeegayo si loo horumariyo bixinta adeegyada bini'aadamka ku salaysan ee Degmada Olmsted.
10. Qiimee dhammaan adeegyada degmada ee wacyigelinta iyo gelitaanka deganayaasha BIPOC iyo dadka loogu adeego habka 'Albaab qaldan ma jiro'. Qaado tallaabo ku habboon.
11. Ku dar Hagaha la-howlgalayaasha ee dheeraadka ah ee Xalka (GPS), kuwaas oo dhaqan ahaan u jawaabaya, si ay ugu doodaan dadka loo adeegayo..
12. Hirgelinta dhaqamada 'Miisaaniyadda ka qaybqaadashada', taasoo la micno ah in hoggaanka Degmada Olmsted uu dhageysto oo uu fuliyo talooyinka xubnaha bulshada ee ku saabsan sida loo qoondeeyo lacagaha dadweynaha.

## Xog ururinta iyo isticmaalka:

13. Maalgelinta kaabayaasha nidaamyada xogta sugan ee gudaha hay'adaha Degmada Olmsted, si loo qabto loona habeeyo xogta si joogto ah looga ururiyo dadka loo adeego, si degmadu u qiimeyso tayada iyo saamaynta barnaamijyada iyo adeegyada. Nidaamyadu waa inay ahaadaan kuwo hufan, wada shaqayn kara, oo waqti ku habboon waaxyaha oo dhan.
14. Kor ka soo dhis, kala shaqee gobolka si loo mideeyo nidaamyada xogta Degmada Olmsted si ay si hufan uga warbixiyaan xogta loo baahan yahay si loo kobciyo wada shaqaynta iyo bar-tilmaameedka.
15. Shaqaalaha Degmada Olmsted waa inay isticmaalaan macluumaadka jira si ay si joogto ah u wanaajiyaan natiijooyinka kala duwan ee jinsiyadda, qowmiyadaha, iwm.
16. La shaqee bulshooyinka BIPOC ee loo adeego si loo fahmo sida hababka xog ururinta ay uga falceliyaan bulshooyinkooda si ay u wargeliyaan oo ay u horumariyaan hababka xog ururinta ee ka jawaabaya dhaqan ahaan..

## Caafimaadka Maaliyadda:

17. Siin qiimayn joogto ah ee nidaamka bixinta gargaarka degdegga ah si loo hubiyo in xubnaha bulshada ee u baahan aanay ku dhicin dildilaaca.
18. Dabbaq Dariiqooyinka Barwaaqada iyo Ladnaanta (PTPW) sidii qaab urureed oo tan u isticmaal si aad u hirgeliso dammaanad buuxda oo la maalgeliyo barnaamijka dakhliga aasaasiga ah ee qoysaska / shakhsiyaadka ay haysato faqriga iyo si wax looga qabto dhibaatooyinka ka jira faa'iidooyinka.
19. La shaqee la-hawlgalayaasha bulshada si loo fududeeyo xiriirka ka dhexeeya xubnaha bulshada iyo hay'adaha maaliyadeed si loo xaqiijiyo dhaqan ahaan waxbarashada maaliyadeed ee khuseeya loona yareeyo dhaqamada ugaarsiga.
20. Raadi habab aad ku yareyn karto saameynta xun ee ka dhalan karta faa'iidooyinka federaalka.

## Guriyenta iyo guri la'aanta:

21. Kordhi fursadaha hoyga degdega ah ee qoysaska iyo dhalinyarada.
22. Kordhi wacyiga dadweynaha iyo la howlgalayaasha bulshada iyo isuduwidda barnaamijyada iyo adeegyada guryeynta ee jira.
23. Hagaajinta nidaamka habsocodka si dadka loo dejiyo dhammaan sii socoshada guriyeynta (housing continuum).
24. Sii wad inaad qiimeyso in heerka guri la'aanta daba dheeraata ee degmada uu hoos u dhacayo oo maalgeli guryaha xasiloon si wax looga qabto meesha looga baahdo.
25. Kordhi tirada la kabi karo iyo fursadaha kiraynta ee Degmada Olmsted ee qoysaska ka hooseeya 200% khadka saboolnimada.
26. Siin kaalmo maaliyadeed oo toos ah si ay uga taageerto shakhsiyaadka iyo qoysaska BIPOC si ay u helaan guryaha kirada ah.
27. Taageerada meelmarinta sharciga guryaha gobolka ee ka dhanka ah takoorka.
28. Marka la eego taariikhda axdiga khadka-cas iyo jinsiyadda, in la sameeyo nidaam dhammaystiran oo y wehliyaan la howlgalayaal dhinacyo badan let si loo kordhiyo lahaanshada guriga ee BIPOC iyada oo diiradda la saarayo u gidbinta kireystayaasha BIPOC mulkiilayaal.
29. Kordhi ikhtiyaarada guriga-iibsiga ee la awoodi karo.

## Dhaqan urureedka iyo nidaamyada :

30. Ku xooji dhaqanka ururka oo leh xeelado lagu taageerayo shanta baahiyood ee aasaasiga ah ee aadanaha (lahaanshaha, ixtiraamka, doorashada, badbaadada jireed iyo nafsiyeed, iyo farxad).
31. Waax kastaa waxay abuurtaa yoolalka DEI oo ay tahay inay ku jiraan kordhinta shaqaalaha BIPOC Olmsted County iyo kordhinta shaqaalaha Degmada Olmsted ee luuqadaha badan ku hadla.Increase BIPOC leadership at the highest pay levels.
32. Kordhi DEI ee diirada FTE si ay u hogaamiso dadaalka ururka oo dhan.
33. Samee, iyada oo loo marayo One Olmsted*, qeexitaannada DEI la wadaago ee Degmada Olmsted oo dhan.
34. Kordhi agabka iyo maalgelinta ee tarjumaanada iyo fasiriyaasha.
35. Hirgelinta tababarka ka-hortagga cunsuriyadda ee Guddiga komishanka ee Degmada Olmsted, Hoggaanka Waaxda Degmada Olmsted, iyo xubnaha guddiga la-talinta.

## Caafimaadka maskaxda iyo isticmaalka maandooriyaha:

37. Tirakoob oo ballaari adeegyada isticmaalka maandooriyaha iyo caafimaadka dhimirka ee dadka waaweyn iyo dhalinyarada si loo hubiyo dhammaan fayoobi maskaxeed oo xoogan, oo ay ku jiraan adkeysiga iyo xirfadaha la qabsiga iyo ka faa'iidaysiga asaaga hababka taageera.
38. Fududeynta dhaqanka bulshada ee badbaadada, lahaanshaha, iyo isku xirnaanta si loola dagaallamo go'doominta bulshada, gaar ahaan ay la kulmaan bulshooyinka midabka leh.
39. Taageer ururada bulshada si ay ugu daraan mabaadi'da dhimista waxyeelada ee caafimaadka maskaxda iyo barnaamijka isticmaalka muqaadaraadka.
40. Tirakoob oo balaari helitaanka adeegyada caafimaadka maskaxda iyo isticmaalka muqaadaraadka ee dhaqan ahaan khuseeya.
41. Fududeynta isticmaalka iyo helitaanka Dawaynta Caawinta Dawooyinka ee xubnaha bulshada.
42. Fududeeyaan isbedelada nidaamka oo dhan ee saameeya helitaanka caafimaadka dhimirka iyo adeegyada isticmaalka muqaadaraadka.